

## **Amarka L. 11. Rep**

### **Dhisidda Maxkamadda Qaybta Dambiyada Culus (Assise).**

#### **MAAMULKA WALAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALI**

#### **XOGHAYAHA GUUD**

Marka uu arkay xeerka 4 Noofemer 1951, 1301 lamba. Rep ee lagu meelmariyay Heshiiskii Wasaayadda Dhulka Soomaaliya ee hoos yimaada maamulka Talyaaniga oo hadda ay si buuxda iyo gebi ahaan u maamusho;

Marka uu arkay qod. 2 ee Amarka 47 ee 1951 kaaso siinaya Xoghayaha Guud awoodda la siiyay Maamulaha, kaaso fasax ku maqan;

Marka uu arkay r. d. 20 Juun 1935, le 1638, Xeerka Garsoorka Soomaaliya;

Markuu tixgaliyay in ay habboontahay in laga dhiso Muqdisho Maxkamadda Qaybta Dambiyad Culus (Assise), waxa laga dhisay qayb ka garsoorta dacwadaha ciqaabta racfaanada laga soo qaato Maxkamadda Qaybta Dambiyadna Culus;

Marka uu dhagaystay talada Golaha Dalka.

#### **WUXUU AMRAYAA**

##### **Qod. 1**

Waxaa laga dhisay Maxkamadda Qaybta Dambiyada Culus ee Muqdisho (Assise) qayb qaadda racfaanada laga soo qaato xukunada iyo go'aanada kale oo ay soo saarto Maxkamadda Qaybta dambiyada Culus (Assise).

##### **Qod. 2**

Qod. 13 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaaliya waxaa lagu baddalay sidan: Garsooridda darajada koobaad ee Maxkamadda Qaybta Dambiyada Culus waxay ka koobantahay Garsoore Ku-xigeen Soomaali ah oo guddoomiye noqonaya iyo lix garsoore dadweyne.

##### **Qod. 3**

Maxkamadda Racfaanka Qaybta Dambiyada Culus (Assise) waxay ka koobantahay Garsoore Soomaaliyeed oo guddoomiye noqonaya iyo lix garsoore dadweyne.

##### **Qod. 4**

Garsooridda Maxkamadda Racfaanka, garsoorayaasha dadweynaha oo uu wehliyo guddoomiyaha waxay ka garsoorayaan arrimaha dhacdooyinka.

Guddoomiyaha keliya ayay u xilsaaran in go'aamiyo arrimaha xeerka.

##### **Qod. 5**

Haddii uu maqanyahay ama ay jiraan wax ka reebaya Garsooraha Soomaliyeed eeku dhawaqay garsooridda xukunka darajada koobaad, kama qaybgali karo garsooridda hortaal Maxkamadda Racfaanka Qaybta Dambiyada Culus.

Sidoo kale kama qaybgeli karaan garsooridda Racfaanka arsoorayaashii dadweynaha ee ka qaybgalay xukunka racfaanka laga soo qaatay.

##### **Qod. 6**

Sikastaba sababaha racfaanka looga soo qaatay xukunka Maxkamadda Qaybta Dambiyada cCulus ee drajada koobaad waa in si faah-faasan loo soo bandhigaa loo muujiyay kuwaaso la'aantood aan la qaban Karin.

#### **Qod. 7**

Xukunka Maxkamadda Racfaanla Qaybta Dambiyada Culus waxaa cabashoo looga qaadan karaa Maxkamadda Sare Jamhuuriyadda Talyaaniga.

#### **Qod. 8**

Xukunka ay ku dhawaaqdo Maxkamadda Qaybta Dambiyada Culus wixii ka dambeeya marka xeerkan la faafiyay iyo kuwa waqtiga xeerkaan marka la faafinayay aanay dhammaan muddadii durista, racfaan ayaa laga qaadan karaa.

Haddii, taariikhda la faafiyay xeerkaan, ay cabasho hortaal Maxkamadda Sare, waxaa u iqtiyaar loo siiyay Dadwyne u Doodaha iyo eedaysanaha in ay weydiistaan baddalka cabashada.....

Haddii ay jiraan cabsho eedaysanayal badan, baddalku dhamman waa u wada jirayaa.

#### **Qod. 9**

Caddaynta cabashada baddalka racfaanka waxaa la geeynaa kaalinta Maxkamadda Qaybta Dambiyada Culus ee Soomaliya ama kaalinta Maxkamadda Sare Jamhuuriyadda Taalyaaniga, muddo ku siman sagaashan cisho dhexdood ee ka bilaabata taariikhda la faafiyay amarkaas.

Caddaynta waxaa samayn kara Dadweyne u Doodaha, eedaysanaha ama qareenka ka difaacaya Maxkamadda Qaybta Dambiyada Culus, ay muuqato in loo magacaabay in uu Maxkamadda Sare ka diffaaco ama uu helay magacabis degdegga.

Magacaabidda waxaa lagu soo saarayaa qaabka lagu sheegay qod. 135 Xeer Habka Ciqaabta

Eedaysanaha xiran wuxuu caddaynta ka soo qorayaa xabsiga uu ku jiro.

Xeerarka kale ee lagu sheegay qod. 54 Xeerka 10 Abril ee 1951, lamba. 27, ee Jamhuuriyadda Talyaaniga, ee ku saabsan dib u nidaaminta garsooridda Qaybta Dambiyada Culus, iyo qaababka la xariira ee ku saabsan wareejinta kaalinta Maxkamadda Qaybta Dambiyada Culus ee Muqdisho ay u soo warejinayso Maxkamadda Sare Talyaaniga, waxaa lagu ballaariyay dhulka Soomaaliya haddii uu la jaanqaadi karo.

#### **Qod. 10**

Dekeretooyin kale ee Maamulaha, ayaa lagu soo saaraya xeerarka dheeraadka iyo kuwa dhammaystiran oo si buuxda loogu fulinayo amarkan.

#### **Qod. 11**

Amarkan wuxuu dhaqan galaayaa maalinta maalinta lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya.

Muqdisho, 7 Juulay 1952.

Xoghayha Guud

**Canino**